

WASAARADDA WAXBARASHADA HIDDAHA
IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 8AAD. 2022

XISAAB



XAFIISKA IMTIXAANKA IYO SHAHAADADA





Xafiiska Imtixaanaadka & Shahaadooyinka

SHAHAADADA SOOMAALIYEED EE TACLIINTA ASAASIGA

FASAL	8AAD	MAADDO	XISAAB	SANAD DUGSIYEED	2021-2022
Magac Afaran:					
Rool Lambar:					
Dugsiga:					
Xarunta:					

Fadlan u akhri tilmaamaha si kaadsiiyo leh kahor inta aadan ka jawaabin su'aalaha:




- Ku qor meelaha u bannaan magaca oo dhammeystiran, rool lambar, dugsiga iyo xarunta.
- Ka jawaab dhammaan su'aalaha. Su'aashii aan laga jawaabin lama saxayo.
- U qor si muuqata, kuna qor qalin leh qad buluug ah.
- Isku day in aad ka jawaabto dhammaan su'aalaha imtixaanka.
- Ku toosnow dhammaan shuruucda imtixaanka iyo waqtiga loo xaddiday.





Hubi in imtixaanku ka koobanyahay 5 Bog





QAYBTA 1AAD EE IMTIXAANKA

B. Goobo geli jawaabta saxda ah:

(40 Dhibcood)

1.	Ururka soo koobaya dhammaan ku tirsanayaasha ururrada, waxaa lagu magacaabaa:			
	B) Urur guud	T)Urur duleed	J)Urur maran	X)Urur dhextaal
2.	Haddii Ururka Guud ee $G = \{buug, qalin, mastarad, sabuurad, jeeso\}$, ururka $B = \{buug, mastarad, jeeso\}$. Urur duleedka B waa:			
				
	B) $\{qalin, mastarad\}$	T) $\{qalin, jeeso\}$	J) $\{qalin, buug\}$	X) $\{qalin, sabuurad\}$
3.	Tiro waliba oo aan ahayn (0) muujiyeheeduna yahay (0) waxa ay le'egtahay:			
	B) 0	T) 1	J) -1	X) 2
4.	Raadi Mugga saddex jibbaaranaha ku sawiran dhanka midig.			
				
	B) $792sm^3$	T) $27sm^3$	J) $729sm^3$	X) $792sm^3$
5.	Qormo qoraalka gaaban 6^5 , tirada 5 waxa loo yaqaanaa:			
	B) jibbaar	T) hooseeye	J) sal	X) muujiye
6.	Haddii mugga saddex jibbaarane uu yahay $125m^3$, dhinaca saddex jibbaaranaha waa:			
				
	B) 4m	T) 6m	J) 5m	X) 10m
7.	Marka aan u qorno 850000 qormo saynis ahaan, waxa ay noqoneysaa:			
	B) 8.5×10^{-5}	T) 8.5×10^5	J) 0.85×10^6	X) 85×10^3
8.	Xilliga sanad dugsiyeedka, arday waliba waxa uu ku beeray deegaankiisa 1×10^4 geed. Haddii 1.5×10^5 arday ay dhigato dugsi, Tirada geed ay beereen guud ahaan ardayda waa:			
	B) 1.5×10^9	T) 1.5×10^{20}	J) 1.5×10^4	X) 1.5×10^5

9.	Fududeynta faraqa laba tibxaale khaaska ah ee $(x + 5)(x - 5)$ waa:				
	B) $x^2 - 25$	T) $x^2 + 25$	J) $x^2 + 125$	X) $x^2 - 125$	
10.	Marka laysku daro $\frac{5x}{21}$ iyo $\frac{4x}{21}$, jawaabtu waa:				
	B) $\frac{9x}{42}$	T) $\frac{20x}{21}$	J) $\frac{9x}{21}$	X) $\frac{x}{21}$	
11.	Marka loo qoro jibbaar ahaan $a \times b \times a \times b \times a$ waxa ay lamid tahay:				
	B) a^3b^3	T) a^2b^2	J) a^2b^3	X) a^3b^2	
12.	Marka laysku qeybiyo $\frac{18abl}{6ab}$ jawaabtu waa:				
	B) $3l$	T) $3b$	J) $3a$	X) l	
13.	Wareegga shaxanka laydiga ah ee soo socda waa :				
					
	B) $4x^2 + 10x + 6$	T) $2x^2 + 10x + 4$	J) $4x^2 + 5x + 6$	X) $3x^2 + 10x + 6$	
14.	Raadi bedka saddex xagalka hoose adiga oo adeegsanaya tibxaha Aljebra				
					
	B) $6sm^2$	T) $2sm^2$	J) $8sm^2$	X) $4sm^2$	
15.	Raadi wadarta bed duleedka ee sadjibekaha soo socda: adiga oo isticmaalaya xeerka: [Bed = $2(dh \times b) + 2(dh \times j) + 2(b \times j)$.]				
					
	B) $301 sm^2$	T) $300 sm^2$	J) $310 sm^2$	X) $315 sm^2$	
16.	Xisaabi bed duleedka ay leedahay dhululubada ku sawiran dhinaca midig. (u qaado $\pi = 3.14$)				
					
	B) $3786sm^2$	T) $3768sm^2$	J) $3678sm^2$	X) $3876sm^2$	

17.	Dhinaca maqan ee saddexagalka hoose adiga oo adeegsanaya aragtida Baytaagoros waa:			
	B) 7sm	T) 5sm	J) 12sm	X) 25sm
18.	Raadi qiimaha xagasha x° ee shan geesoolaha qaabsan ee soo socda.			
	B) 100°	T) 105°	J) 180°	X) 108°
19.	Fogaanta u dhaxeysa labada barood $(0, -3)$ iyo $(0, 3)$ waa:			
	B) 5 halbeeg	T) 6 halbeeg	J) 7 halbeeg	X) 8 halbeeg
20.	Wareegga guud ee saddex xagalka hoose waa:			
	B) 8 sm	T) 15 sm	J) 10sm	X) 7 sm


T Isku beeg qeybta kowaad iyo qeybta labaad sida ay isugu beegan yihiin (20 Dhibcood)

T	Qeybta kowaad	Lambar	Qeybta labaad
21.	{6,8,10,12,14}		45°
22.	$8 \times 8 \times 8 \times 8$		Bart-bartameed
23.	$\sqrt[3]{512}$		$\frac{5x}{7}$
24.	$\frac{8000000}{10000}$		$2x^2$
25.	$\frac{x}{7} + \frac{4x}{7}$		isla'egyo wadajira
26.	$x(2x)$		$2x$
27.	$\begin{cases} x + y = 12 \\ x - y = 4 \end{cases}$		{x/x waa tiro dhaban $4 < x < 16$ }
28.	$\frac{4xb}{2b}$		8^4
29.	xagal dibadeedka siddeed geesle qaabsan waa		8
30.	Bar dhacda bartanka xariijin		8×10^2

J. Buuxi meelaha banana (20 dhibcood)


- 31 Ururka soo koobaya dhammaan ku tirsanayaasha ururrada waxa lagu magacaabaa.....
- 32 Marka la fududeeyo $a^3 \times a^2 \times a^7$ loona tibaaxo saan-saan jibbaar jawaabtu waa
- 33 Marka laysku daro jajabka $\frac{x}{8} + \frac{2x}{8}$ jawaabtu waa.....
- 34 Marka loo bedelo 3×10^3 saan-saanka caadiga ah, jawaabtu waa
- 35 Dhinaca Labajibbaarane ayaa ah $2ab$, haddaba wareeggiisu waa.....

36. Bedka Laydi dhinacyadiisu ay yihiin $(m + 5)$ iyo $(m - 5)$ waa
37. Fududeynta $(x + 4)^2$ jawaabtu waa.....
38. Xeerka lagu helo cabbirka bed duleedka **dhululubo oodan** waa.....
39. Wadarta xagal gudeedka ee afar geesle qaabsan waa
40. Dhinaca maqan ee saddex xaglaka hoose waxa uu noqonayaa




QAYBA 2AAD EE IMTIXAANKA: Kajawaab su'aalaha soo socda:

41. U qor ururrada soo socda habka tixidda. (4 dhibcood)
- b) $A = \{x: x \text{ wabiyada mara Soomaaliya}\}$
- c) $B = \{x: x \text{ waa tiro kisi ah, } 25 < x < 35\}$
42. U muuji jibbaar ahaan waxa soo socda. (4 dhibcood)
- b) $m \times n \times m \times n \times m$
- t) $(-a) \times (-a) \times (-a) \times (-a)$
43. Qor Kullannada bar kasta (4 dhibcood)



- 1).....
- 2).....
- 3).....
- 4).....

44. Jaranjaro dhererkeedu yahay $13m$ ayaa lagu tiiriyey derbi dheer oo joogiisu yahay $12m$. Hadda xisaabi fogaanta u dhaxeysa salka hoose ee derbiga iyo jaranjarada? (4 dhibcood)



45. Furfur isle'egyada wadajira $\begin{cases} 4x + 6y = 32 \\ 3x - 6y = 3 \end{cases}$ (4 dhibcood)

DHAMAAD